



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Luulyo 15, 2022

Ku socota: Hay'adaha maamulka kiiska (CME-yada) iyo daryeel bixiyayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Waad ku mahadsan tihiin shaqadiina ee ku saabsan qiimaha lacageed ee cusub iyo kala saarida/soocida

Luulyo 1 waxay taariikh weyn u ahayd dhammaanteed ee ka shaqeynta nidaamka naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) ee Oregon. Waxaanu si guul leh u hirgelinay heerarka lacageed ee cusub ee Compass Project ee loogu talagalay guryaha dadka waayeelka ahi koox ahaanta u degan yihiin, taageerada hawlaha maalintii (DSA), gaadiidka iyo dhammaan adeegyada shaqada.

Kuwani oo dhan waxay qaateen shaqo badan oo ay ku jiraan:

- Kala saarida/soocida xirfadlaha adeega hab-dhaqanka iyo adeegyada kalkaalinta tooska ah
- Wax ka beddelka eXPRS iyada oo sababtu tahay wax beddelayaasha 'modifiers' cusub oo loo baahday
- Wada hadalo lala yeeshay dadka iyo daryeel bixiyayaasha oo ku saabsan kala doorashada fursada adeeg
- Bilaabida kooxaha adeega oo cusub oo ku saleysan Qiimeynta Baahiyaha ee Oregon oo loogu talagalay noocyadan heerarka lacageed
- Dib u eegida adeega oggolaanshaha hore (SPA-yada) ee sii socda 'rolled over' iyo gelinta SPA-yada cusub ee loogu talagalay wax beddelayaasha 'modifiers' cusub.

Waad mahadsan tihiin, hawl-wadaagayaasheena jooga CME-yada iyo hay'adaha daryeelka bixiya. Shaqaalaha ODDS iyo aniguba waxaan ka mahadcelinaynaa wax u doodistiina, shaqadiina adag iyo hurida aad wax hurteen. Waxaad gacan ka geysateen sameynta hirgelintan habsamida leh.

Haddii aad caawimaad dheeraad ah uga baahan tihiin qiimaha lacageed ee cusub, fadlan dib u eega [ilaha dhanka internet-ka ee loogu talagalay CME-yada iyo daryeel bixiyayaasha](#) iyo [website-ka tababarka dhanka internet-ka ee Compass Project](#) kaasi oo ay ku jiraan meelo laga sii gelayo 'links' tababaradii hore, tababarada la dalbado iyo wicitaanada taageerada farsamo ee soo socda.

Shaqaalaha ODDS iyo aniguba waxaan ka mahadcelinaynaa ka qayb qaadashadiina joogtada ah iyo dadaalkiina ku aadan Compass Project. Inaga oo wadajirna, waxaanu hore u qaadnay tallaabo weyn oo ah dhanka wanaajinta adeegyada iyo taageerada I/DD ee Oregon ee loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee qaba I/DD.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee

adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la,  
dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada  
dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan  
bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo  
[www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).